# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal-qoraalka iyo Gudiyadda

### Kal-fadhigii 33aad Fadhigii 2aad

### Axad 05/03/2017

**Fadhigu Wuxuu furmey 9:51 AM**

### Gudoomiyaha: - Baashe Maxamed Faarax

**Quraan: - Xildibaan Xuseen Ismaaciil Yusuf**

### Ajendaha Fadhiga: - Dooda Ajendaha kal-fadhiga 33aad

**Gudoomiyaha: -** Fadhigii shaley waxaa mudanayaasha loo qeybiyay ajendihii kal-fadhiga, markaa manta waxaynu bilaabeynaa dooda ajendaha xildhibaanada raba in ay ka doodan ha is qoraan.

**Md. Cabdiraxmaan Cismaan Caalin: -** shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan samayaa Ajandahani waxaa uu u qoranyahay si faqiir ah oo aan haboonayn ayuu u qoran yahay, waxaa ku qoran Sadex Xeer oo wasaarada macdantu gacanta ku hayso todoba xeer oo gudiyadu hayaana waxay ku qoran yihiin. Markaa waxaan soo jeedinayaa in xeerarka codaynta u baahan waa in loo horaysiiyaa.

Waxaa jira in ajandahan ajandihii ka horeeyay aynaa inaga oo aynaan waxba ka qaban aan iska dhaafnay. Maxaa inoo diiday in aan halkiisii ka sii bilawno, hadal sadexda xeer ee kala ah: -

- Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo soo saaristiisa
- Xeerka Dakhliga shidaalka
- Xeerka Macdanata Somaliland

Waxaan leeyahay xeerarka dooda u baahana waa in aan galnaa

**Md. Saleebaan Cawad Cali (Bukhaari): -** mudane gudoomiye waxaan soo jeedinlahaa in xeerarka wixii codayn u baahan waa in loo soo horaysiiyaa wixii dood u baahan waa in hawshooda la galaa, waxaana cabdiraxmaan ku raacsanahay in Ajandihii hore la sii wado.

Laba Arimood oo golaha mudo yaalay oo laga wada hadlay oo uu dastuurka iyo kitaabkaba uu khilaafsanyahay Xeerka baanku, sidaa awgeed maadaama aanu kitaabkeena waafaqsanayn waan in Meesha aan ka saarnaa waayo maalin walba hadal iyo muran ayuu keenaa ilaahay cida la murantaana wuu ka adkaadaa oo qoorta ayuu ka jabinayaa ee xeerkaa inaga ilaaliya oo inaga joojiya, hadii aad qolo tusaysaana ajandaha xaga danbe ka galiya oo waxaad tidhaahdaan wakhtiga ayaa ka dhamaaday.

Qodobka labaad ee aan ka hadlayaa mudane gudoomiye waa xeerka saxaafada waxaa Meesha ku qoran in uu yahay akhriskii labaad, waxaana loo saaray gudi gaar ah gudidii Xukuumada iyo

wasaaradiiba may soo arag oo hadana gudi gaara lagu bood siinayaa waan fahmiwaayay waxaa loola jeedo, hadii la doonayo in laga doodo oo la soo gudbiyo oo uu qalalaaf soo marana hal keeno oo gudii lahay ee arimaha Bulshada gacanta ha loo galiyo oo ha soo diyaariyeen, laakiin gudidaa gaarka ee lagula booday Meesha kuma jirto.

**Md. Faarax maxamuud Cabdile: -** shirgudoonka iyo mudanayashaba waan salamayaa munane gudoomiye xeerar mihiin ah ayaa ku jira, waxa aan kaliya kusii darilahaa halka ay ku qorantahay Xog-ogaal u noqoshada xaalada dalka iyo abaaraha iyo sixir bararka Ayaan ku soo darilahaa waayo madaxweynuhu waxaa uu ka soo saaray digreeto, tiina lama tixgalin, markaa waa in goleheena uu ka soo baxaa arimo khuseeya sixirbirarka.

Xeerarka baanka oo ay Zaaduna ku jirto waa in aan ka hadalnaa waayo waxyaabaha sixirbararka kaw ka ah ayay ku jirtaa ee waa in hoos loo eego laguna talaxtagaa.

Waxaa kale oo aan soo jeedinyaa oo aan iyagana aad la dulmari karin, waayo shaqadiiba wey socotaa waana in xeer laga soo saaraa, hadii kale sharci dora ayay noqonaynaa wixii hada lagu baadhaaba, sidoo kale waxaa isna u baahan in uu soo boxo xeerkaa macdantu, si buuraha la dhameeyay sharci loogu helo oo sharci daradan lagu guranayaa ay u joogsato. Xeerarkaasi waa in ay inaga baxaan halka inta kale sidooda aan ku taageersanay.

**Gudoomiyahe Baashe: -** Mudanayaa waxaa jira xeerarbadan oo ay gudiyadu hayaan oo aanay soo gudbin waxaan u sheegayaa gudiyadaa hadii uu xeerku dhaafo laba wiig gudidda waa laga wareejinayaa oo gole weynaha ayaa toos loo keenayaa xildhibaanadaana ka doodaya, waayo gudiyadii xeer ay soo celinayaan Ayaan jirin.

**Md. Ibraahin Jaamac Rayte: -**marka hora waan idin salamayaa waxaanan rabaa in aan marka hore golaha attention-kiisa ku soo jeediyo xaalada dalku uu ku sugan yahay, waayo Hargeisa ayay nu joognaa Hotelo ayaynu ka cashaynaa ku caweynaa dalku xaalad uu ku sugan yahanyna war uma hayno, dadkii miyiga joogay way dhimanayaan, halka xoolihii %60 ay ka bexeen waxa dhaqdhaqaaq ah oo aynu haynaana ma jirto.

Gudoomiye dalka natural resaster ayaa ka taagan waxaanan jeclaa in madaxweynuhu uu ku dhawaaqo xaalad deg-deg ah oo wax walba oo kale la joojiyo oo dadkaa dhibku haysto loo gur mado waayo kuma filna in la yidhaa laba bilood mushahar ha loo jaro waayo dhawr boqol oo ku ayaa macaluuli haysaa qarkana u saaran in ay leedaan.

Gudoomiye waxaan soo jeedinayaa xeerarkan faraha badan ee halka ku jira muhiimada koowaad waxaa ka leh oo hadii ay nu nahay golihii dadkani soo doorteen gaar ahaan goboladii la iga soo doortay hadii ay sidan sii socoto dee cidiba ku hadhi mayso, gudoomiye waxaan leeyahay aan ku baraarugno xaalada dalka ka jirta.

Waxaana loo baahanyahay wax ay dawladu hayso iyo waxa ay dadku hayaan gacmo amaano aha lagu hubsadaa, waana in gudida abaaraha dib loogu noqdaa, waayo waynu maqalaa manaynaan arag, ama waa in gudi qaran oo cid walba ku jiro la sameeyaa ama hay'adaha ku shaqada leh oo aynu ka dul guurnay oo aynu u guurnay gudi aan lahayn xeer hoosaad u wareegnay, nidaam ay ku shaqeeyaanba wananan leeyahay waa in halkaa lagu noqdaa.

Waxaa kale oo aan xildhibaan farax dheere la qabaa arinta shidaalka gudoomiye waxaa jirta wasaarad dhan oo shaqaysa xeel la'aana ku shaqaysa oo waxa ay qabanayaa iyo sida ay u shaqeeyaan aan cidna Acountable u ahayn oo aynaan garanayn maalinkaa maanta ah waxa ku jira, waxaan leeyahay wax activity ah maaha in laqabto ilaa la helo xeerarka macdanta iyo xeerka baadhista shidaalka oo golahana ansixiyo waa sharci daro waa qayru dastuuri danta qarankana wey ka soo hor jeedaa waxaanay inoo horseedaysaa mugdi iyo musuqmaasuq.

Khayraadka dalkana wasaarad iyo nin kaliya laguma aamini karo, waxaan leeyahay xeeka macdanta iyo iyo shidaalka golahani muhiimad ha ka dhigto hadii arinkaa wax laga qaban waayo waxay keenaysaa iyada oo abaarahaasi jiraan mashaakil hoose oo ay arimahasi kicin doonaan deegaamada ay hawlahaasi ka socdaan, waxaan leeyahay gudoomiye baarlamaanku waa in uu waajibkooda gutaan oo baarlamaankan yay u taalaa wasaaraduhu sid ay u shaqaynayaan iyo sida ay u dabo taagnaanayaan.

Waxaa kale oo aan leeyahay xeerarkani sida ay u kala muhiimsanyihiin aan u kala horumarino iyo sida ay u kala diyaar yihiin oo uugu horeeyo xeeka kaganacsiga baananku, dalkana waxaa curyaamiyay ganacsi xumo waayo wadan aan lahayn commercial banks waa qof aan wadne lahayn weeye, wadnaha dhaqaaluhu waa baananka ganacsiga, investment dalka la galin garaa ma jiraan hadii aanay baanan jirin, waxaanan qabaa in uu sixirbararka kaw ka yahay markaa waa in aan soo hor marina.

Xeerka Booliiska Gudoomiye waxaan qabaa xeerkaasi waxaa uu u baahanyahay shaqo aad u farabadan waa la inagu soo celiyay oo wwuxuu haya shir-gudoonka waa in lanagu soo wareejiyaa oo aan waafajinaa dastuurka mana aha xeer dhamaystiran oo heer caalami ah oo madmadaw badan ayaa ku jira qaybo dhana waa ay ka maqan yihiin oo shaqada booliiska ahna waxaanu u baahanyahay in la dhamaystiro.

**Md. Xamze Maxamed Gaadoweyne: -** Gudoomiye waxaad moodaa intii aan odhan lahaa in la yidhi khaasatan cabdiraxmaan iyo Rayte wanan ku taageersanahay %100 ajandahana waxaa ku jira waxyaabo badan oo wanaagsan kaliya waxaa uu u bahanyahay in la cadeeyo mihiimada ay kala leeyihiina aynu u samayno waayo waxaan halka hore marin lahaa

- Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo soo saaristiisa
- Xeerka Dakhliga shidaalka
- Xeerka Macdanata Somaliland

Waayo waxay mudan yihiin lagu shaqotago marka laga hadlayo shidaal iyo macdan shirkadaha waaweyni way khiyaameeyaan dawladaha yaryar ee sideenan oo kale ah waxaanay u sii wakiishaan shirkado yar yar oo kale hadhawna waxaa soo baxda wasakh farobadan oo aan la qaban Karin shirkadaa yar ee somalida ahina aanay awood u lahay tusaale ahaan waxaa ka mid ah Nayjeeriya, gobol ka mid ahaa wadankaa oo laga kaluumaysan jiray beeraha ugu badana ay ka beeran jireen ayaa hada waxaa uu isku badalay meel aanay waxba ka bixin waayo saliidii ayaa ku fiday oo gaadhay biyihii waana la maarayn kari waayay.

Markaa waxaa ayaa inagu soo socda waana in aan aad uga taxadirnaa. Arinta baanka waxaan u arkaa in ay tahay dhaliisheena ee waxaan leeyahay xeerkaa ha la sii daayo bilaa caleeek waayo wadamada muslimka ah wey istimaalaan wayna inooga aqoon badan yihiin waanay ka furan yihiin ee waa in aan sii daynaa.

Halka aan leenahay wasaarad heblaayo Ayaan ku shaqaynayn xeer inaga ayaa wax ka qaban karnee aan ka qabano oo awoodeena aan muujino.

**Md. Maxamuud Jaamac Xaaji Cilmi (Dable):- shirgudoonka** iyo akhyaarata xildhibaanada ahba waan salamayaa, gudoomiye maroodigu awoodiisa lama tusin, Baarlamaankuna waa Meesha ugu xooga wayn ee aanu aan la tusin xoogiisa, mushikladaha ina haystaana inaga oo aan cid eedayn masuuliyada taariikhiga ah ee ay umadu ina saaratay ayaynaan gudanayn, damiirkeenuna ma shaqaynaayo, diinteenuna ma shaqaynayso. Markaa Ayaan cid kale iyo dawladna midna aan la canaananin, waayo marka maraykan la yidhaa sanadka ayaa lagu hor gaynayaa kaadi ayuu isku siidaayaa markaa inaga ayaa fursada siinay sidaa awgeed waa in aan danbigeena qaadanaa marka danbana aan dadka saxnaa oo baarlamaanku sharciga ha ku dhaqmo cid walba wuu ka adkaanayaaye.

**Gudoomiye baasha: -** xildhibaan ajandaha ku soo noqo

**Dable:-** Ajanduhuba waa halka ay masiibadu ka socotee waayo wasiirkii arimaha dibadu waa kaa halkaa ku soo qoray wixii ay baarlamaanku soo saareen waxba kama jiraan, markaa danbiga yaa leh? Inagaa leh. Waxaa kale oo aan la yaabanahay marka la samaynayo ajandaha waxaa lagala tashadaa gudoomiyayaasha gudiyada ee karaaniga iyo shirgudoonku ma qoraan dee! oo wixii ay ku darayaan ay ku daraan si uu u noqdo wax midho dhal ah, markaa waa in aad arinkaa ajandaha ku dartaan.

Qodobka kale ee aan rabaa waxaa uu yahay waa run gaajo we jirtaa sixirbararna wuu jiraa ee maxaa dadka loo siin waayay lacagaha laga qaado shidaalka waxaa kale oo distoorka ku taalay lacag reserve ka ahayd oo baan walba way taalay laakiin hada mataalo waa in miisaaniyada looga jaraa oo umada wax loogu qabtaa.

Mida kale ee aan ka hadlayaa waxay tahay arinka la leeyahay lacag ayaa la maydhayaa dee doobiilaha loo gaynayaa waa kee, waxaanan doonayaa in arinkaa loo sharoxo si cilmiyan ah oo dastuuriyan iyo sharciyan hala sharaxo lagactaa la maydhayo iyo siyaabaha loo maydhayo.

Arinka baananka ee inagu soo noqonotay waxaan odhan lahaa mufti Ayaan leenahay ee hala weydiiyo oo aha ina yidhaa siidaaya, maxaa inaga oo kaliya masuuliyada ina saaray waayo wasaarad iyo muftigaa ayaa diinta inooga wakiil ah ee ha ina yidhaahdeen waxaasi waa xaaraan taasina waa xalaal oo ha sheegeen.

Arinka baabuurta hadii aan siidaynayno waa in aan baabuurta isteerin aan badalnaa ama waa in aa wada badalnaa oo aan ku soo celinaa sideedii oo ay labada dirawal is arkaan iyada oo wax kale la badalin.

Xeerka booliska ee uu ka hadlaya saaxiibkay waxaa loo soo qortay nin waliba sidii uu doonayay waana mid aan madax iyo mijo lahay markii aan ka shaqaynay iskuna dunay ayaa waxaa dhacday in madaxweynaha loo gubiyay wax ayay kasoobadasheen oo sidii ay soonayeenayay u soo qorteen, markaa gudidani waa gudi garanaysa qawaaniinta ciidamana ay ku jiraan, sidaa awadeed sidii aan u qornay waa la badelay ee waa in sidii hore ee aan uga shaqaynay loo daayaa ama la noo keenaa aan ka shaqaynee.

Waxaa kale oo aan golaha u sheegayaa marna sharci ayaynu ka hadlaynaa sharci darana waan ku dhaqmaynaa labdaa xaalo aan kala dayno Ayaan odhan lahaa oo aan distoorka raabno Ayaan odhan lahaa. Waxaa kale oo aan leeyahay wixii golaha la inoo keeno waa in uu inaga eegaa sharci yaqaanka goluhu waxaana leeyahay inaga oo leh gudi qaanuuniya warqada la inoo keeno waa in saleebaan loo geeyaa waa qalad waanna in uu sharciyaqaan keenu uu wixii dawliya ee la inoo keeno uu darsaa oo aynu nidhaahna waa sax ama waa khalad, wa salaamu calaykun.

**Mrw. Baar Siciid Faarax: -** shir gudoonka iyo xildhibaanadaba waan salamayaa gudoomiye ajandaha waxaan ku soo darayaa qodan qaarna waan ka soo qaadnayaa qodobka aan ku soo darayaa waa in lagu soo daraa xeer-hoosaadkii golaha waayo dadna maalin walba waa taagan yihiin dadna meelahaa hoteelada ayay iska joogaa iyada oo ay shaqadii socoto taasina cadaalad maaha waanan codsanaayaa.

Mida kale gudoomiyaha baanku wuu yimid halkan waaanu shaqaray xeerka maydhista lacagta malah Maxamuud waa uu maqnaaye waxaanu sheegay in baahi badan ayuu u qabo baanku.

Waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa in ay inaga baxaan kal-dhiagan xeerarka kala: -

- Xisaab xidha dawlada oo uu wakhtigiisii dhaafay
- Xeerka Somaliland road Authority xeerkaasina waa muhiim
- Xeerka ilaalinta deegaanka waay dhib wadan ayaa ka jirta deegaan keenii oo abaaran waxaa inoogu wacan deegaan kii oo baaba'ay
- Xeerarka madaxweynaha ka soo noqday waxaan qabaa in aanay wax badanba u baahnayn ee waa in la ansixiyaa kuwaana sida xeerka booliska waa in aan

iska hubinaa waayo waxyaabaha la soo badalay waxaa ka mid ah in askarigu uu qofka xabad ku dhufan karo, taasina waa mid aan dhici karin.

- Xeerka saxaafada waa in aan eegnaa in laga gardaranyahay iyo in ay gardaranyihiin maalinwalba way xidhxidhayihiine waa inuu inaga gudbaa
- Xeerka xawaaladaha isna waan soo dhaweynayaa.
- Xeerka macdanta

Waxaan kale oo aan ku darayaa mid aan Meesha ku jirin oo magaalada ka taagan oo dadkii baqdin ayaa la galiyay baqdintaa oo ah dadka wax sixra ama ciyaalada xada oo dadkii la qabqabtay waxaa la sheegayaa in ay ka mid yihiin boolisku dadkana si dhib yar loo sii daayo sababtana lamagaranayo markaa waxaan soo jeedinayaa in taliyaha loo yeedho, gudina waa in loo saaraa arinkaa Ayaan soo jeedinayaa.

**Maxamed X Maxamuud Cumar- Xaashi: -** waan salamayaa shirgudoonka iyo mudaayaashaba waxaan soo jeedinayaa in aan ugu horaysiino xaalada abaarta ee dalka ka jirta iyo sixir bararka waa in aan ka hadalnaa oo go'aamo laga soo saaro Ayaan soo jeedin ahaa

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa xeerka baananku mudo badan ayuu inagu soo noqnoqday oo ilaa 5-6 bilood ah hadii aanay ka badnayba wadan aan baan lahayna ma soconayo tah dusha laga odhanyo ee waa ribana wax ka jiraa ma jiraane ninkuisaga ayaa ikhtiyaarka leh

Waxaa soo jeedin lahaa gudoomiye iyada oo la eegayo dhaqaalaha dalka, iyada oo aynu eegayno in aan duni ku noolnahay oo aynaan kaligeen meel taagnayn wadamada muslimku wey badan yihiin, dad diinta inooga aqoon badana wey badanyihiin markaa waxaan soo jeedin lahaa in labarka labaad laa dhigo xeerka baananka waanan idiin mahadnaqayaa. Waad mahadsantihiin.

**Gudooye Baashe: -** waxaa jira gudiyo haysta 6 bilood haysta waana in 2 todobaad waa in aad ku keen taan ajandahana waan dhamaynaynaa insha allaa waxaa kale oo gudiyado loo gudbiyay 17 wasiir waa in ay ka soo talo bixiyaa n sida ugu dhakhsaha badan kalana la hor keenaa

Waxaa kale oo aan xildhibaanadku war galinayaa in ay ka soo xaadiranaan golaha 9:00 Am fadhiguna wuu xidhan yahay waad mahadsantihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Ag. W/Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------- | ----------------------------------------- |